## 10 Baare u Yeer oo Qaado Shahaadada Gelitaanka

Baaraha Dhismaha ama soonaha ayaa dhici karta in loo baahdo ka hor inta aadan furin ganacsigaaga. Si aad u hesho macluumaad dheeraad booqo www.denvergov.org/developmentservices.

## 11 Furida Ganacsigaaga

Marka tallaabooyinkan aad dhammaystirto, aassaas adag ayaad dhiddabada u taagtay oo, adiga oo la kaashanaya dadaal adag iyo nasiib, kaas ayaa ganacsigaaga ku hagi doona Mile High City!

Xafiiska Kobcinta Dhaqaalaha ee Denver waxay bixiyaan barnaamijyo iyo adeegyo kala duwan si ay u gacan qabtaan ganacsiyada cusub iyo kuwa doonaya in ay ganacsigoodu ay Denver ku ballaariyaan. Kaalmadaas waxay kala yihiin maalgelinta ganacsiyada yar ilaa shaqaalaysiinta, Kaalmo Dhanka Soonaha Canshuurta iyo u Tilmaamida barnaamijyo iyo illo iskashi oo degmo waynta ku kala baahsan, adeegga OED sida illo ganacsigaaga ka caawinaya in Denver ay ku guulaystaan.

**Xafiiska Kobcinta Dhaqaalaha ee Denver**
(Denver Office of Economic Development)
*OED @ Commons: 1245 Champa St.*
*720-913-1999 denvergov.org/oed*

## 12 Dabbaaldegga Guusha

***Nasiib wacan dadaalkaaga cusub!***

SOMALI

# LIISKA BILAABIDA GANACSIGA

**Tilmaamaha furitaanka ganacsi Degmada iyo Deegaanka Denver dhexdeeda**

DENVER
THE MILE HIGH CITY

# Denver ku soo Dhowoow!

Waad ku mahadsan tahay keenida ganacsigaaga aad keenayso Degmada iyo Deegaanka Denver. Si lagaaga caawiyo in ganacsigaaga aad bilowdo, Xafiisyadaa Kobicnta Dhaqaalaha, Canshuurta iyo Shatiyaynta iyo Adeegyada Kobcinta ayaa liiska warbixintaeedkan soo diyaariyay si ay kaaga caawiyaan tilmaanta hay'addo dhowr ah oo degmada ka jira.

Maadaama ganacsi kasta ay mas'uuliyadda saaran tahay in ay dhammaystiraan oggolaanshaha loo baahan yahay ka hor inta aan la furin, liiska warbixintaeedkan wuxuu kaa caawinnayaa in daahitaan aan daruuri ahayn.

Waxaa dhici karta in shuruudaha ay ku kala duwan yihiin nooca ganacsi oo aad damacsan tahay in aad bilowdo ama aad balaariso, balse 11 tallaabo ee soo socda ayaa ah tilmaamo wanaagsan ee waxa aad la kulmi doonto. Inkastoo aysan sax ah ahayn, waxaad isticmaali kartaa https://translate.google.com/ boggaga tilmaamahana lagu soo qaato.

## 1 Ganacsigaaga Qorshey

Samee fekir ganacsi suuqgeyn

Magacaw suuqa, badeecada ama adeegga kooxda macaamiisha ee aad bartilmaamaydsanayso

Go'aami goobta ganacsi

Magacaw inta kaaga baxaysa qarashaadka biloowga

Qoro qiyaasta lacagta inta bixi karta seddexda sannadood (inta ugu daran, inta waaqica, inta ugu wanaagsan)

La taliyayaal xulo (la taliye/qareen/CPA)

**ILLAHA:**

***Tilmaanta Illaha Ganacsi ee (Colorado Business Resource Guide)*** *- www.coloradosbdc.org and click on "resources"*

***Xarunta Kobcinta Ganacsiga Yar ee (Denver Small Business Development Center)*** *- www.coloradosbdc.org*

***La Taliyayaasha Ganacsiga Yar ee Amerika Counselor to America's Small Business (SCORE)*** *- www.denver.score.org*

## 2 Dooro Goob Ganacsi oo Soonaha Go'aami oo Shuruudaha Ruqsadda Soonaha

Marka good aad xulanayso, waxaa muhiim ah in aad iska xaqiijiso in goobta aad xulanayso yahay mid ganacsiga ku haboon. Waxyaabaha aad xisaabta ku darrayso waa sida nooca dhismaha, goobta, soonaha iyo barta gaariga la dhigto ee la heli karo. Ku fekir in aad la shaqayso qandaraasle shatiyaysan oo meelaha qibrad u leh.

**MACLUUMAAD DHEERAAD AH:**
**Adeegyada Kobca**
(Development Services)
*201 W. Colfax Ave., Suite 203*
*www.denvergov.org/developmentservices*
*720-865-2790*

## 3 Magaca iyo Qaabka Ganacsigaaga Diiwaangeli

Raadi magaca ganacsi ee la helayo oo magaca iyo qaabka ganacsigaaga ka diiwaangasho:

**Xafiiska Xoghayaha Gobolka Colorado**
(Colorado Secretary of State)
*1700 Broadway, Suite 200*
*www.sos.state.co.us* *303-894-2200*

Inkastoo aysan shardi ahayn, waxaa lagula talinayaa in aan la tashato qareen iyo/ama CPA [Xisaabiye haysta Shahaado Sare] si aad kala tashato qaabka ganacsi ee aad ka dhigi la'hayd tusaale ahaan (ganasi hal qof, ganacsi wadashaqaynm, iwm.) ee adiga kugu haboon.

## 4 Waaxda Canshuurta iska Diiwaangeli Heer Magaalo, Gobol, iyo Federaal

Waxaa jira dhowr nooc oo canshuur oo ay dhici karto in la dhaafo sida canshuurta ganacsiga ee canshuur celinta, canshuurta shaqaalaha, canshuurta beeca iyo canshuurta degmada ganacsiga. Hubi oo iska diiwaangeli Waaxda Maaliyada ee Denver, Waaxda Canshuurta ee Colorado iyo Adeegga Aruurinta Cashuuraha Gudaha dowladda Maraykanka si aad u hesho xogta canshuurta daruuriga u ah ganacsigaaga.

Degmada: Si aad u diiwaangeliso canshuurta degmada, canshuurta u celiso ama koontooyinka maaraynta canshuurta, booqo Xarunta Canshuurta ee halkan iska diiwaangeli www.denvergov.org/ebiztax.

**Qaybta Maaliyada ee Denver** (Denver Treasury Division)
*201 W. Colfax Ave., Atrium* *720-913-9400*

**Gobolka:** Lambarka Aqoonsiga Canshuurta wax libinta iyo canshuurta gobolka, booqo bogga internetka ee Colorado Business Express, www.colorado.gov/cbe.

**Dowladda dhaxe**: Dhammaan noocyada ganacsi, aysan ka ahayn shirkad shaqsi oo aan shaqaale kale la'hayn, waa inay haystaan Lambarka Aqoonsiga Shirkad ee Federaal [Federal Employer Identification Number (FEIN)]. FEIN waa lambarka aqoonsiga canshuurta federaalka. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan canshuurta federaalka:
**Adeegga Aruurinta Cashuuraha gudaha Mareykanka**
(Internal Revenue Service) *www.irs.gov* *800-829-1040*

## 5 Mas'uuliyadaha Loo Shaqeeyaha

Ganacsigu waa inuu isku diiwaangeliyaa sida ganacs loo shaqeeye, bixiyaa canshuur dheeraad, haynta lacag, qabataa lacagta shaqaalaha laga qabto ee canshuurta, lacagta caymiska canshuurta shaqaalaha oo aad adheecdaa xeerarka xaq u yeelashada shaqaalaha. Tilmaamaha Illaha Ganacsi ee Colorado waxaa ku jira qayb mowduucan waxtar u leh (www.coloradosbdc.org oo ka dibna riix "resources").
Shuruudaha Caymiska Baagamuudada
[Unemployment Insurance]:
Booqo bogga internetka ee Colorado Business Express, www.colorado.gov/cbe, si ganacsigaaga aad uga diiwaangeliso Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Colorado si aad u samaysato koonto caymiska baagamuudada.

## 6 Helista Ruqsadda Soonaha

Ruqsadda soonaha ayaa markastaaba loo baahan yahay ka hor inta aadan helin ruqsadda dhismaha ee dayactirka (haddii isticmaalka dhismaha ama isbeeska ganacsiga uu yahay mid ka duwan kii hore loo isticmaalayay ama haddii oggolaanshaha soonaha loo baahan yahay ruqsad ama shati kale).

Waxaa lagu talinayaa kullan arji hore.
Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

**Adeegyada Kobca** (Development Services)
*201 W. Colfax Ave., Suite 203*
*www.denvergov.org/developmentservices*
*720-865-3000*
*(su'aallaha soonaha ku saabsan oo cod-duuban)*

## 7 Go'aanso Nooca Dhaqdhaq ee Ganacsi oo Qaado Ruqsad ama Shatiga Gaarka ah ee aad u baahan tahay

Ruqsaddaha & Shatiyada Degmada: Si aad oggaato haddii dhaqdhaqaaqa ganacsigaaga uu u baahan yahay ruqsaddo ama shatiyo gaar ah, fadlan la soo xiriir:

**Shatiyanta iyo Canshuurta** [Denver Excise and Licensing]
*201 W. Colfax Ave., Suite 206* *Telfoon: 311*
*www.denvergov.org/businesslicensing*

Ruqsaddaha & Shatiyada Gobolka: Ka sokow waydiisashada ku saabsan ruqsaddaha iyo shatiyada degmada ee dhaqdhaqaaqa ganacsigaaga ka sokow, fadlan fiiri Hay'addaha Colorado ee Waaxda Sharcifulinta [Colorado Department of Regulatory Agencies] ee ku saabsan shuruudaha shatiyaynta

**Hay'addaha Colorado ee Waaxda Sharcifulinta**
[Colorado Department of Regulatory Agencies ]
*1580 Broadway, Suite 1350*
*Denver, CO 80202*
*303-894-7800*
*www.colorado.gov/dora*

## 8 Ogolaansho iyo Ruqsado Kale Hel (haddii loo Baahdo)

Si aad tani wax uga ogaato la soo xariir xafiiska Adeegyada Kobca:

Waxaa dhici karta in aad u baahato Ruqsada Maaraynta Biyaha iyo Wasaqda, taas waxay ku xiran tahay caddada ama nooca biyo ee ganacsigaaga aad ugu baahanayso.

Oggolaanshaha Waaxda Caafimaadka Bay'adda [Department of Environmental Health (DEH)] ayaa dhici karta in loo baahdo goorta cunto laga shaqaynaayo ama ay tahay xarun xannaaneynta caruurta [daycare]. Sidoo kale oggolaanshaha DEH ayaa loo baahan yahay meelaha waaskada biyaha dabaasha ama meelaha isbaaga ah.

Waxaa dhici karta in loo baahdo oggolaanshaha Waaxda Dab-damiska.

## 9 Helista Ruqsadda Dhismaha (haddii loo Baahdo)

Ruqsadda dhismaha ayaa loo baahan yahay haddii:

Haddii wax iska beddel ah jiro, sida ku qeexan Dhismaha Denver Xeerka. (Haddii wax isbeddel ah jiro, waa in oggolaansho ADA laga heystaa, kaa soo ay dhici karto in isbeddel dhismaha looga baahdo.)

Macaamiilka ayaa xulanaya wixii isbeddel ee gudaha ah. (Dhammaan wixii isbeddel ee kale waa in xeerka dhismaha la waafajiyaa.)

Si aad u hesho macluumaad dheeraad booqo www.denvergov.org/developmentservices.